

XEERARKA ANSHAXA

Maktabada Ismaamulka San Diego ayaa goob soo dhawayn leh siinaya bulshada si ay iskugu yimaadaan wax ugu bartaan, ayna isku dhex galaan. Xeerarka Anshaxa ayaa difaacaaya xuquuqaha macaamiisheena, shaqaalaha iyo mutadawiciinta anagoo xaqiijinayna ilaaliinta agabka iyo xarumaha maktabada. Fadlan naga caawi dhowrista biil'ada taasoo amaan leh qof kastana uu ku raaxaysan karo.

Habdhaqannada soo socda iyo falalka ayaa mamnuuc ah:

- ◆ Fal sharci daro ah.
- ◆ Ku dhaqmid la'aanta amarada caafimaadka dadwaynaha ama amarada ay maktabadu dhaqan gelisay si loo xaqiijiyo in lagu dhaqmo amarada caafimaadka dadwaynaha.
- ◆ Dhibaatayn, hanjabaadaha iyo/ama cagajuglaynta ayna ku jirto luuqada cayda ah ee dhiiri gelinaysa rabshada, ama qaylada ama fal loola danleeyahay ayna suurtagal tahay inuu abuuro carqalad loo gaysto dadka kale.
- ◆ Hubka sharci darada lagu haysto nooc kastaba. Xatooyada iyo burburinta hantida.
- ◆ Cabista sigarka, shiishada, ama khamriga lagu cabu gudaha maktabada ama aag uga dhow 20 albaabka.
- ◆ Xayeysiinta agab ganacs iyo qaybintiisa.
- ◆ U adeegsiga qubayska, xaaqista, dhaqista dharka, ama u adeegsiga musqusha ujeedo ahaan ahayn tii loogu talagalay.
- ◆ Ilmaha aan cidna wadin ee jira 8 sano iyo ka yar, ilmaha waa qasab inuu la socdo qof masuul ah oo jira 12 sano ama ka wayn.
- ◆ Urka ama nadaafada ay dadka kale u arkaan wax xun.
- ◆ Soo gelista maktabada adiga oo aan xirnayn dhar sax ah, ayna ku jiraan kabo iyo shaarar.
- ◆ Seexashada ama isticmaalka xad dhaafka ah ee booska qofka taasoo carqalad ku ah in macaamiisha kale adeegsadaan booskaas. Keenista qasacyo kasta, baakado, boorsooyin, baarseelo, ama busteyaal maktabada dhexdeeda kuwaasoo si keli ah ama wadarta guudba ka wayn 24"x 18"x 6".
- ◆ Keenista saladaha dukaamaysiga ama gaari gacannada taayirada leh oo la keeno dhismaha, marka laga reebo gaari curyaannada iyo tarooleyasha ilmaha/xanbaareyaasa loo adeegsado gaadista saxda ah ee qof ama ilmo ama boorsooyinka taayirada leh iyo buug xanbaarada aan ka waynayn 24"x15"x12" (marka laga reebo kuwa gacanta).
- ◆ Keenista bacaha lagu seexdo, duubabka hurdada, ama busteyaasha gudaha dhismaha (busteyaasha ilmaha yaryar waa la ogol yahay). Uga tagista alaabaha shaqsiga ah meel cidlo ah ama dhigistooda meel caqabad ku noqonaysa in si badqab leh loo galoo, looga baxo, loona maro gudaha maktabada.
- ◆ Shidista muusig ilaa ay dadka kale maqlaan marka laga reebo in aaladu waafaqsan tahay Sharciga Ameerikaanka Naafada ah, ku hadlida ama ku heesida gudaha Maktabada ilaa inaad samaynayo maahee bandhiga munaasabad maktabadu qabanayso; iyo dhawaaqyada kale ee carqalada ku ah isticmaalka maktabada ee macaamiisha kale.
- ◆ Xayawaannada aan ahayn kuwa adeegga.
- ◆ Cuntada ama cabitaanka aan la daboolin, ilaa inay qayb ka yihiin maahee munaasabada maktabada.
- ◆ Dabeeecad kasta oo fawdo ah taasoo shaqaalaha Maktabadu ay si macquul ah u go'aanshaan inay dhibaato ku tahay isticmaalka saxda ah ee Maktabada ay u isticmaalayaan macaamiisha kale ama gudashada shaqaalaha ee waajibaadkooda.

Dhammaan shariyada khuseeya ee federaalka, gobalka, iyo kuwa maxaliga ah waa in lagu dhaqmaa.